


DISCOVER
ITS BEAUTY

Qaybta 3aad

# ABC-YADA ISLAAMKA

DR. NAJI IBRAHIM



# ABC-yada Islaamka

Islaamku wuxu na barayaa in dariiqa lagu gaadhayo nolosha farxadda leh, lagu qanacsan yahay ee aan dhammaanayn ay tahay in la rumeeyo Ilaahay Allaha Keliga ah ee Dhabta ah iyo Rasuulkiisii ugu dambeeyay ee Muxammad.

Islaamku sidoo kale wuxuu noo sheegayaa in rumaysnaanta Ilaahay iyo Nebiyadiisa oo keliya aysan ku filnayn in la helo xasillooni maskaxeed, farxad, iyo badbaado! Waa inaan fulinnaa doonista Ilaahay; innagoo caabudayna isaga oo **KALIYA,** amarradiisana addeecayna, oo sameynayna camallo wanaagsan.

Intaas waxaa sii dheer, Ilaahay wuxuu Quraanka kaaga warramayaa cafiska, ajarka, iyo Jannada uu u diyaariyey kuwa Ilaahay rumaystay, isaga kaligiisna caabuday oo camal wanaagsan sameeyey:

- ***"Laakiin kuwa rumeeyey oo camal wanaagsan falay - kuwaas ayaa ah asxaabta Jannada; halkaas oo ay ku waari doonaan weligood."*** (2:82)
- ***"Ilaahay wuxuu u yaboohay kuwa rumeeyay oo camal wanaagsan falay inay heli doonaan cafis iyo abaal weyn."*** (5:9)
- ***"Dhab ahaan, kuwa Alle rumeeyay oo camal wanaagsan falay waxay heli doonaan Beerta Jannada oo hoy u noqon doonta."*** (18:107)




# Macnaha Islaamka

Macnaha Islaamka waa in loo hoggaansamo doonista Allaah oo ah Ilaaha runta ah. Sidaas darteed, rumaysnaanta Kelinimada Ilaahay (**Tawxiid**), caabudidda isaga kaligiis, addeecidda amarradiisa, iyo u hoggaansamidda doonistiisa waa aasaaska farriinta Ilaahay uu u soo diray dhammaan Nebiyadiisa iyo Rasuulladiisa. Ereygan ***'u hoggaansamid'*** waa macnaha ereyga ***Carabiga ah ee "Islaam"***.

Maadaama Nebiyada iyo Rasuullada Ilaahay dhammaantood ay ku wacdiyi jireen (dadka) hal farriin oo isku mid ah; diintooduna waa inay isku mid ahaataa!

Quraanka wuxuu xaqiijinayaa in ***"Islaamku"* (U Hoggaansamidda Ilaahay)** ay tahay diinta runta ah ee Aadan iyo Xaawa iyo farcankoodii illaa Maalinta Qiyaamaha. Quraanku wuxuu leeyahay:

- ***"Dhab ahaan, diinta Ilaahay agtiisa waa Islaamka (u hoggaansamidda Allaah)"*** (3:19)
- ***"Dheh, dhab ahaan, hanuunka Allaah waa hanuunka runta ah; waxaana nalagu amray inaan u hoggaansano Rabbiga caalamka."*** (6:71)
- ***"Haddaba ma diin kale oo aan ahayn ta Ilaahay (Islaam, u hoggaansamidda Ilaahay) ayay rabaan? Waxaana u hoggaansamay isaga waxa ku jira samooyinka iyo dhulka, rabitaankooda ama rabitaankooda la'aan, xaggana isaga waa loo soo celin doonaa.?"*** (3:83)



# Macnaha Islaamka (socd.)

***"Dhaha, [Mu'miniintow], "Waxaan rumaynay Allaah iyo waxa naloo soo dejiyey iyo waxa loo soo dejiyey Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub, iyo Farcanka, iyo waxa la siiyey Muuse iyo Ciise, iyo waxa la siiyey Nebiyada xagga Rabbigood." Ma kala saarno midkoodna, annaguna waxaan nahay Muslimiin [u hoggaansamay] Isaga."*** (2:163)

Waxaa xusid mudan in macnaha Islaamka laga heli karo sidoo kale Baybalka isaga oo leh:

- ***Isku dhiib Eebe oo nabad ku noqo isaga; si sidan barako kuu soo gaarto.*** (Job 22:21)

- ***Marka isku dhiiba naftiinna Ilaahay.*** (James 4:7)

Sida ku cad cilmiga Islaamka oo ina faraya in rumaysnaanta Allaah – oo aan camal wanaagsan iyo falal fiican la socon – aysan ku filnayn in badbaado iyo nolol weligeed ah (Janno) lagu helo, Baybalku wuxuu qorayaa:

- ***Aniga, Rabbiga, waxaan baaraa qalbiga oo qiimeeyaa maskaxda, si aan qof walba ugu abaalmariyo sida ay u yihiin falalkooda iyo camalkooda.*** (Yeremyaah 17:10)

- ***Waad aragtaa in qofka loogu caddaalad falo camalkiisa ee aanay caqiidadiisu oo keli ah ku filnayn... Si la mid ah sida jirka bilaa ruuxda ahi u dhintay, ayay caqiidada bilaa camalka ahi u dhimatay.*** (James 2:24-26)




# Muslimiinta Ku Dhaqma Diinta

Runtii, Muslimiintu maaha oo keliya kuwa Allaah (Ilaaha runta ah) rumeeyay, laakiin sidoo kale waa kuwa camal wanaagsan sameeya. Waxay addeecaan amarrada Ciise, Muxammad, iyo dhamaan Nebiyadii ay bareen waana ay u hogaansameen, sida: rumaysnaanta hal Ilaah oo run ah, tukashada, iyo inay Alle u sujuudaan oo u rukuucaan iyagoo caabudaya, soonka, bixinta sadaqada iyo sekeda, iyo iyagoo oranaya: Haddii Allaah yidhaahdo ***(Insha Allaah)*** marka wax mustaqbal ah laga hadlayo. Waxay sidoo kale adeegsadaan salaanta Nabi Muuse, Ciise, Muxammad, iyo Nebiyadii kale ee ahayd: "Nabad korkiinna ha ahaato, ***(Assalamu Alaikum)***.


Kuwaas waa tusaalooyin yaryar iyo daliilo si cad u muujinaya runta, midnimada, iyo caalaminimada diintan quruxda badan ee dhammaan Nebiyada Allaah wadeen: ***'Islaamka'*** **(U Hoggaansamidda Eebe)**.

Si dhab ah markaan u hadallo, qofka Muslimka ah, ama qofka raba inuu qaato diinta Islaamka, waa inuu rumeeyaa qodobbada iyo mabaadi'da aasaasiga ah ee Caqiidada Islaamka.



# Rumaysashada Allaah

## Ilaaha Kaliya ee Xaqa Ah



**1. Rumaysnaanta Allaah (Ilaaha runta ah)** – jiritaankiisa, kelinimadiisa (Tawxiidka ee afka Carabiga), Rabbinimadiisa, magacyadiisa iyo sifooyinkiisa gaarka ah, iyo in uu yahay keligiis kan mudan in la caabudo.

Quraanka Kariimka ah iyo Nebi Muxammad (NNKH) waxay na barayaan magacyada iyo sifooyinka Allaah, Ilaaha runta ah. Marna ma fahmi karno weynaanta Allaah, laakiin hadba inta ay le'eg tahay aqoonta aynu u leenahay Isaga, ayay le'ekaan doontaa jacaylka iyo cibaadada aynu u hayno. Kuwa soo socda waa qaar ka mid ah magacyada iyo sifooyinka Allaah:

Allaah (magaca saxda ah ee Ilaahay), Rabbiga, Ilaaha runta ah, Naxariistaha, Raxiimka, Abuuraha, Boqorka Awoodda Leh, Kan Quduuska ah, Kan Saafiga ah, Kan Barakaysan, Kan Nabadda iyo Wanaagga Keena, Xaakimka ah, Kan wax walba og, Kan wax walba arka, Kan wax walba maqla, Kan Weyn, Kan Cafiska badan, Kan Ugu Sarreeya, Kan Sareeya, Kan Ugu Jacaylka Badan, Kan Ugu Naxariista badan, Kan Risiqbixinta Badan, iyo Kan Runta ah.

Nebi Muxammad (NNKH) wuxuu yiri: ***"Astaamaha quruxda iyo saxnaanta kama dambaysta waxay u gaar yihiin oo leh Allaah. Runtii, Allaah wuu jecel yahay quruxda.."***



**2. Rumaysnaanta Malaa'igta** kuwaas Allaah uu u abuuray si ay isaga ammaanaan oo addeecaan iyagoo fulinaya amarradiisa.

**3. Rumaysnaanta waxyiga Ilaahay soo dejiyay,** oo ay ku jiraan Kutubtii asalka ahayd ee Allaah ku soo dejiyey Ibraahim, Daawuud, Muuse, iyo Ciise. Quraanka Kariimka ah waa Kitaabkii ugu dambeeyay, saafiga ahaa, ee saxda ahaa ee Ilaahay u soo soo dhiibay Nebi Muxammad (NNKH).

**4. Rumaysnaanta dhammaan Rasuullada iyo Nebiyada Ilaahay,** oo ay ku jiraan Aadan, Nuux, Ibraahim, Muuse, Yooxanaa Baabtiisaha, Ciise, iyo Muxammad (NNKH). Dhab ahaan, qofka Muslimka ahi ma noqon karo mu'min run ah haddii uusan rumayn Muuse iyo Ciise (iyo anbiyada kale) inay ahaayeen Nebiyo laga soo diray xagga Ilaahay, Allaha Runta ah, Abuuraha ah.

**5. Rumaynta Maalinta Aakhiro,** Maalinta Xisaabta iyo garsoorka. Maalintaas, banii'aadamka oo dhan waxaa xisaabin doona Allaah, iyada oo loo eegayo rumaysnaantooda iyo camalladooda.

Marka Ilaahay umadda kala xukumo, kuwa Allaah rumeeyay ee camal wanaagsan sameeyey; waxaa la gelin doonaa nolol farxad leh oo weligeed ah oo Jannada taalla. Kuwa Allaah diiday, camal wanaagsan samayn waayey, oo amarradiisa jebiyeyna; waxaa lagu tuuri doonaa Naar (haddii Alle sidaas doono).




# Lixda Qodob ee Iimaanka ee Islaamka
## (socd.)

**7. Rumaynta Qaddarka** uu Alle horay u go'aamiyay iyo Ogaanshihiisa iyo aqoontiisa wax walba ku aaddan.

Si kastaba ha ahaatee, madaama dadka mu'miniinta ahi ku kalsoon yihiin Ilaahay; waxay ku qanacsan yihiin oo ku faraxsan yihiin wixii Allaah ugu talagalay, ha noqdaan kuwo ula muuqda wax wanaagsan ama wax xunbee. Waxay isku dayaan inay ka fogaadaan quusashada, niyad-jabka, ama rajo beelka marka ay dhibaatooyinku ama masiibooyinku ku dhacaan. Halkii ay ka quusan lahaayeen, waxay intii karaankooda ah hagaajiyaan xaaladooda, laakiin waxay u laabtaan Ilaahay oo kaalmo, caawimo iyo ajarka ka dalbadaan.

Iimaankani quruxda badan ee Allaah iyo qadarkiisa wuxuu Muslimiinta siiyaa xasillooni maskaxeed iyo qanacsanaan, inkastoo ay la kulmaan musiibooyin, gardarro, duullaan, qabsasho, iyo boobka dhulkooda, shidaalkooda, iyo hantidooda ah. Waxa intaa dheer, waxay u adkaystaan caddaalad-darro, takoor, eex, iyo aflagaaddo kasta oo loo geysto.





# Shanta Tiir ee Islaamka

Islaamku wuxuu na barayaa inaan ku camalfalno tiirarkaas iimaanka. Intaa waxaa dheer, marka laga soo tago samaynta camallo wanaagsan guud ahaan, Muslimiinta iyo ciddii rabta inay qaataan Islaamka waa inay dhaqangeliyaan shantan tiir ee aasaasiga ah:

1. ***Shahaadada* (Waa qiritaanka iimaanka)**.

*Qiraatankan* waa tiirka ugu muhiimsan waana albaabka loo maro Islaamka. Waxa loo qoraa sidan marka lagu dhigo afka Carabiga.

***ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,***
***WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASOOLU ALLAH.***

Macnaheedu waa:

***"Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay".***

Qirashadan waa tan ay tahay in qofku ku dhawaaqo si uu Islaamka u qaato; waxay soo koobaysaa runta, quruxda, iyo fudaydka Islaamka.





**2. *Tukashada* (Salaadda):**

Salaadda waxa loola jeedaa shanta salaadood ee maalinlaha ah ee waajibka ku ah Muslimiinta oo dhan. Salaadahaas waxay ka kooban yihiin istaagid, rukuucid, iyo sujuud; akhrinta qaybo ka mid ah Quraanka; ammaanta iyo xusuusta Allaah; iyo dalbashada naxariistiisa, cafiskiisa, iyo Jannadiisa.

Quruxda iyo awoodda salaaddu waxay keenaan korriin ruuxi ah, raaxo maskaxeed, iyo taageero, iyo sidoo kale degganaansho iyo qanacsanaan dhanka qalbiga, maskaxda, iyo nafta ah. Sida salaadaha ay u kala duwan yihiin maalinta iyo habeenka oo dhan, waxay nagu xusuusinayaan Allaah (Ilaahay) mar walba.

Waxa kale oo quruxda salaadda sii kordhinaya xaqiiqada ah in Nebiyadi Alle – oo ay ku jiraan Aadan, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, iyo Muxammad (NNKH) – ay sidoo kale u tukadeen oo ay u sujuudeen Ilaaha runta ah ee Allaah. Si kale haddii loo dhigo, Muslimiintu waxay raacayaan raadkii iyo jidkii Nebiyada iyo Rasuullada Allaah.

Intaa waxaa dheer, fikrado qurux badan oo kale, sida jacaylka Allaah, u hoggaansamidda iyo isku dhiibiddiisa, baryada, midnimada, sinnaanta, daacadnimada, samirka, khushuucda, is-dhuldhiga ayaa lagu dhex muujiyaa oo lagu bartaa salaadda.

Runtii, tukashada daacadda ah, dikriga (xusida Allaah), istiqfaarta (raadinta danbi-dhaafka), iyo ducada (baryada) – oo loo jeedinayo Allaah oo keliya – waa furayaal qoto dheer oo yaab leh oo lagu gaaro xasilloonida maskaxda, degganaanshaha, iyo barakooyinka.



# Shanta Tiir ee Islaamka (socd.)

**3. *Sakada* (Bixinta Sadaqada Waajibka ah):**

Sakadu waa tiir waajibinaya in qofku qayb cayiman oo hantidiisa ka mid ah siiya fuqarada iyo dadka baahan. Waxay nadiifisaa hantida iyo lacagaheena, isla markaana waxay inaga nadiifisaa damaca iyo bakhaylnimada. Waxay ina baraysaa isu naxariisashada iyo wax wadaaga, taas oo dhista buundooyin xooggan oo jacayl iyo istexgelin ah oo u dhexeeya fuqarada iyo dadka wax haysta. Runtii, waxay xoojinaysaa taageerada, is-caawinta, iskaashiga, iyo midnimada bulshada oo dhan.





**4. *Soomka* (Soonka):**

Soonka macnihiisu waa ka fogaanshaha cuntada iyo cabbitaanka, iyo xiriirka gogosha, laga bilaabo waaberiga ilaa qorrax-dhaca inta lagu jiro bisha Ramadaan. Faa'iidooyinka iyo casharrada quruxda badan ee soonka waxaa ka mid ah:

- **Faa'iidooyinka Ruuxiga ah:** Waxaan horumarinaynaa taqwadeena (cibaadada iyo dhowrsanaanta) iyo daacadnimada. Bisha soonka ee Ramadaan waxay na siisaa fursad aad u wanaagsan oo aan ku helno naxariista Allaah, cafiska, iyo in laga badbaado Naarta laguna galo nolol weligeed ah oo Jannada ah.
- **Faa'iidooyinka Akhlaaqda iyo Dareenka:** Dugsiga Ramadaanka soonka waxaan ku garawsanaa oo kula kulanaa gaajada malaayiinka qof ee adduunka qaybihiisa kala duwan ula kulmaan si aan ku talagal ahayn. Tani waxay nagu dhiirrigelisaa inaan wax wadaagno, isu naxariisano, is dhul-dhigno, oo noqono kuwo deeqsinimo iyo kal-nixitaan leh.
- **Faa'iidooyinka Waxbarashada:** soonku waxay na baraysaa casharro badan; tusaale ahaan, waxaan aragnaa inay suurtagal tahay in laga tago ama la joojiyo caadooyin xun sida cunista xad-dhaafka ah. Soonku wuxuu anshixinayaa dhaqankeenna wuxuuna na baraa inaan noqono kuwo samir leh oo is-xakameeya. Intaas waxa dheer, wuxu na xusuusinayaa in Nebiyadii Allaah sida Muxammad, Muuse, iyo Ciise (NNKH) ay iyaguna soomi jireen.
- **Faa'iidooyinka Caafimaadka:** Iyadoo la marayo nidaamka soonka ayuu jidhku ka takhalusaa sunta iyo baruurta xad-dhaafka ah ee ku guda jirta. Dhakhaatiirta iyo khubarada nafaqadu waxay badanaa ku taliyaan soonka, iyagoo ku tilmaamaya inuu yahay "qashin-gube" iyo "hab-daawayneed," sidoo kale waxa la xaqiijiyay inuu daawo u yahay cudurro kala duwan.


Namirah Mosque
Mosquée De Namira
Nemire Mescidi
مسجد نمرة

**5. *Xajka* (Booqashada Maka):**

Xajku waa booqashada Maka ee Muslim walba ku waajibka ah inuu sameeyo hal mar noloshiisa, haddii uu awoodi karo jir, maskax, iyo dhaqaale ahaanba.

Sida tiirarka iyo mabaadi'da kale ee Islaamka, quruxda, casharrada, iyo faa'iidooyinka Xajku waa kuwo tiro badan. Malaayiin mu'miniin ah oo midabyo iyo jinsiyado kala duwan, oo ka kala yimid adduunka oo dhan, ayaa ka soo jawaaba baaqii Nebi Ibraahim, oo (isagoo ay la jiraan xaaskiisa Haajara iyo wiilkiisa Ismaaciil) lala xiriiriyo qaar ka mid ah cibaadooyinka iyo rukumada Xajka. Mabaadi'da iyo fikradaha quruxda badan ee lagu arki karo Xajka waxaa ka mid ah: u hoggaansamidda iyo addeecidda Allaah, walaalnimada Islaamka, midnimada, samirka, naxariista, tukashada, sadaqada, iyo soonka. Isku-imaatinka sanadlaha ah ee Xajku wuxuu noqdaa kulanka ugu weyn uguna gaarsan ee caynkiisa ah ee diimeed ee dunida oo dhan ka dhaca.

Inta lagu jiray kulankan cajiibka ah ee dhammaan jinsiyadaha iyo midabada oo dhan isugu yimaadeen, oo ay u wada cibaadaysanayaan Ilaah keliya iyagoo raacaya hal farriin oo keliya, ayay Malcolm X iyo dad kale oo badan heleen quruxda iimaanka saxda ah, walaalnimada, iyo sinnaanta Islaamka.

Malcolm X wuxuu yiri: ***"Safarkaygii Xajku wuxuu ballaariyey aragtidayda. Wuxu i siiyay aragti cusub. Laba toddobaad oo aan ku sugnaa Dhulka Barakaysan, waxaan arkay wax aanan waligay ku arag 39-kii sano ee aan joogay Mareykanka. Waxaan arkay dhammaan jinsiyadaha, dhammaan midabada – kuwa indhaha buluugga leh ee cadaanka ah ilaa kuwa Afrikaanka ah ee maariinka madow ah – oo walaalnimo dhab ah wadaagaya! Midnimo! U noolaanaya sidii hal qof! U cibaadaysanaya sidii hal qof!"*** (Buugga Taariikh-nololeedka Malcolm X)

# Sharaxaada Magacyada Waaweyn ee Islaamka

**Allaah:** Ereyga Carabiga ee Allaah waa magaca gaarka ah ee Ilaaha Keliya ee Runta ah, Abuuraha. Islaamku wuxuu barayaa in Ilaahay yahay Ilaaha runta ah ee dhammaan bini'aadamka.

**Muxammad:** Nebigii ugu dambeeyey ee Ilaaha runta ah ee Allaah Abuuraha, loona soo diray aadanaha oo dhan. Muxammad wuxuu faray dhammaan dadka inay caabudaan Allaah (Ilaahay) oo keliya.

**Islaamka:** U Hoggaansamidda Doonista Ilaaha runta ah ee Allaah.

**Muslim:** Qof u hoggaansamay doonista Ilaaha runta ah ee Allaah; oo caabuda isaga oo keliya.

**Qur'aanka Sharafta Leh:** Kitaabkii ugu dambeeyay ee uu soo diray Ilaahay, Allaha dhabta ah. Waxaa lagu soo dejiyey Nabi Muxammad (NNKH).

**Masjidka (Masjid):** Meel nadiif ah oo loogu talagalay salaadda, waxaana badanaa isticmaala Muslimiinta si ay ugu tukadaan oo ugu caabudaan Alle.



ALLAH oo ku qoran Carabi



Muxammad oo ku qoran Carabi



Qur'aanka Sharafta Leh



Muslim baryaya ALLAH (Ilaaha runta ah)

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.

Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:


أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.






GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب أبجديات الإسلام باللغة الصومالية